



AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-03

KU DHAWAAQIDA XAALADA DEGDEGA SABAB LA XIRIIRO DILAACA FAYRASKA CORONA (COVID-19) EE OREGON

ORS 401.165 *et seq.* waxay xoojisaa in Gofantooraha ku dhawaaqo xaalad degdeg xiliga la go'aansanayo in xaalad degdeg ah ay dhacday ama dhowdahay. Sida waafaqsan ansixintaas, waxaan ogaaday in caabuqyada cudurka fayraska corona abuuray halista caafimaadka iyo badbaadada bulshada, oo ka koobantahay xaalada degdega oo gobolka oo dhan sida waafaqsan ORS 401.025(1).

Cudurka fayraska corona wuxuu sababaa jirooyin loo yaqaan COVID-19. Fayraska corona waa koox fayrusyo oo sababi karo cudurka neefsashada, oo si la filanayo u sababi karto jirooyin daran ama qasaaraha nolosha.

Ka bilow Maarso 8, 2020, waxaa jiro 14 dacwadaha fayraska corona oo la saadliiyay ama la xaqiijiyay ee Oregon, 430 dacwadaha Mareykanka, iyo 101,927 dacwado caalamka oo dhan, guud ahaan 94 wadamo. Mareykanka waxaa jiray 19 dhimasho, iyo caalamka oo dhan waxaa jiray 3,486 dhimasho. Xiliga Janaayo 30, 2020, Guddiga Gurmada Xiriirada Caafimaadka Caalamiga ah ee Hay'ada Caafimaadka Aduunka waxay ku dhawaaqeen in dilaaca "walaaca caalamiga ah ee gurmada caafimaadka bulshada." Xiliga Janaayo 31, 2020, Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka wuxuu ku dhawaaqay xaalada degdega ee caafimaadka bulshada oo Mareykanka ah. Labo gobolo oo ku yaalo Oregon iyo dhoor gobolo ayaa sidoo kale ku dhaaqay xaalada degdega ee dilaaca fayraska corona, oo ay ku jiraan California iyo Washington.

Sida waafaqsan Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka: Mareykanka, COVID-19 wuxuu soo bandhigay halista caafimaadka bulshada "sareysa" ee imaankarto, labadaba caalam ahaan iyo Mareykanka. Wuxuu ku faafaa qof-ku-qof oo dhinaca qufaca iyo hindhista, taabashada shaqsiga dhow, sida taabashada ama gacmo salaamida, ama taabashada shey ama sagxad leh fayraska, iyo kadib taabashada afkaaga, sankaa, ama indhaha. Aastaamaha waa qandho, qufac iyo adkaanshaha neefsashada.

Xiliga Jaanyo 21, 2020, Maamulka Caafimaadka Oregon, Qeybta Caafimaadka Bulshada waxay diyaar gareeyeen kooxdooda maareynta dhacdada si ay ugu diyaar garoobaan oo uga jawaabaan COVID-19. Xiliga Febraayo 28, 2020, Gofonatoraha wuxuu ku dhawaaqay usu imaatinka Kooxda Jawaabta fayraska Corona oo ku shaqo leh xiriirinta gobolka iyo hay'adaha deegaanka iyo maamulada caafimaadka oo diyaar garowga ka jawaabta COVID-19. Xiliga Maarso 2, 2020, Gofantooraha wuxuu diyaar gareeyay Xarunta Xiriirinta Xaalada Degdega.



AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-03 BOGGA LABO

Si markaas loo hubiyo in gobolka si buuxdo ugu diyaargareysanyahay COVID-19 iyo in maamulada gobolka iyo deegaanka u hayaan illaha looga baahanyahay in looga jawaabo COVID-19, ku dhawaaqida xaalada degdega ah waa muhiim.

HADEET SIDAAS DARTEED, WAXAA HALKAAN LAGU JAHEEYAY OO LAGU AMRAY IN:

1. Maamulka Caafimaadka Oregon iyo Agaasimaha Caafimaadka Bulshada waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka muhiimka ah oo ku ansixinayaan sida waafaqsan ORS 401.651 illaa 401.670, ORS 433.443, iyo ORS 431A.015 si looga jawaabo, loo xakameeyo, loo yareeyo, oo looga soo kabsado xaalada degdega, oo ay ku jiraan laakin kama xadidna:
 - (a) Howlgelinta tabarucayaasha xirfadlayaasha daryeelka caafimaad ee xaalada degdega sida waafaqsan ORS 401.661;
 - (b) U xilsaarida xarumaha daryeelka caafimaadka ee xaalada degdega sida waafaqsan ORS 401.657;
 - (c) Kadib la tashiga taqasusyada caafimaadka ku haboon, aasaasida iyo ubaahnaanta isticmaalka cudurka iyo jaheynada daaweynta iyo siinta ogeysiinta jaheynadaas ee bixiyayaasha daryeelka caafimaad, machadyada iyo xarumaha;
 - (d) U ansixinta jaheynada gacansiga gaarka ah ee la xiriiro xadeynada shaqada ku haboon, haddii ay muhiim tahay.
2. Haddii loo baahdo, waxaan ka codsanayaa caawin dhinaca Heshiiska Caawinta Maareynta Xaalada degdega sida waafaqsan ORS 402.105 iyo Diyaarinta Caawinta Maareynta Jasiirada Wuqooyiga galbeed sida waafaqsan ORS 402.250.
3. Xafiiska Maareynka Xaalada degdega waa inay, la tashataa Agaasimaha Maamulka Caafimaadka Oregoniyo Agaasimaha Caafimaadka Bulshada, haddii ay muhiim tahay, qaad tallaabo walba oo lagu ansixiyay sida waafaqsan ORS 433.441. Dhammaan hay'adaha loo aqoonsaday sida qeyb ka ah Kooxda Jawaabta fayraska Corona ee Gofanatooraha waxaa lagu jaheeyay inay bixiyaan xafiisyo Xarunta Xiriirnta Xaalada degdega.



Dhammaan hay'adaha dowlada waxay isticmaalayaan oo ka howlgalayaan shaqaalaha gobolka, qalabka, iyo xarumaha oo howlo walba iyo dhammaan howlaha sida ay codsadeen oo ay xiriiryeen Xafiiska Maareynta Xaalada degdega Oregon. Dhammaan muwaadaniinta waxay ka taxadarayaan tallada saraakiisha xaalada degdega oo la xiriirto dilaacaan si markaas loo illaaliyo caafimaadkooda iyo badbaadada.

AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-03 BOGGA SADEXAAD

4. Sida muhiimka u ah jawaabta xaalada degdega, waxaan ansixinayaa dhammaan hay'adaha fullinta dowlada gobolka inay qaadaan, xiliga jaheynta dheeraadka ah oo aniga ama xafiiskeyga ka imaaneyso, tallaabooyin walba oo lagu ansixiyay sida waafaqsan qodobada lagu dajiyay ORS 401.168 illaa 401.192.
5. Hay'adaha gobolka waxay hormarinayaan oo fullinayaan nidaamyo, oo ay ku jiraan ka dhaafida xeerarka ama soo saarida xeerar ku meelgaar ah oo gudaha maamulka hay'ada, sida waafaqsan tallooyinka Agaasimaha Caafimaadka Bulshada, loo naqshadeeyay ka hortaga ama baabi'inta halista caafimaadka bulshada.
6. Ku dhawaaqidaan waxay u adeegtaa sida xaalada degdega caafimaadka bulshada oo ORS 653.616, taas oo u ogolaato shaqaalaha inay isticmaalaan waqtiga jirada sida lagu qeexay ORS 653.616(6).
7. Dadka aaminsan inay gaartay qiimooyin xad dhaaf ah oo alaabaha macmiilka muhiimka oo la xiriirto ah dilaaca fayraska corona waxaa lagu dhiirogelinayaa inay ku soo wargeliyaan anshaxaas qadka Waaxda Illaalada Cadaalada Macmiilka Oregon, ee 1-877-877-9392.

Xaaladaan degdega waxay dhammaaneysaa lix maalmood ka bilow taariiqda Amarkaan Fullinta, illaa uu kordhiyo ama uu joojiyo xili hore Gofonatooraha. Natiijooyinkaan iyo amarkaan waxaa horaan lagu sameeyay ku dhawaaqida hadalka saacada 8:14 p.m. ee maalinta 7^{aad} ee Maarso, 2020, oo lagu xaqiijiyay qoraal ahaan Amarkaan Fullinta xiliga maalinta 8^{aad} ee Maarso, 2020.

Xafiiska Gofonatooraha Gobolka Oregon



Waxaa lagu sameeyay Portland, Oregon maalintaan 8^{aad} ee Maarso, 2020.

Kate Brown

Kate Brown
GOFANATOORAHA

CADEYNTA:

Bev Clarno

Bev Clarno
XOGHAYAH GOBOLKA

